

Xubinta bulshada ee Qaaliga ah,


Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa dhagaysi dadwayne **ISNIINTA, DISEEMBAR 7, MARKAY SAACADU TAHAY 7 FIIDNIMO** si ay u dhagaysato fikirkaaga ku aadan daynta canshuurta iyo miisaaniyada sanadka 2021. Dhagaysiga waxaa lagu qaban doonaa oonleen ahaan aalada WebEx. Si aad u hesho tilmaamo ku aadan sida looga qaybgalo, fadlan booqo blm.mn/cc-1207. Daynta canshuurta magaalada ee horudhaca ah ee 2021 waxaa dajisay Dawlada Hoose bishii Sibteembar. Waa la yarayn karaa kahor dhaqan gelinta ugu danbaysa, laakiin lama kordhin karo.

Saamaynta canshuurtaan lasoo jeediyay ku yeelan doonto canshuuraha gurigaaga ayaa lagu qeexay bayaanka boqshada ku jira ee kasoo baxay Degmada Hennepin.

SAAMAYNTA COVID-19 KU LEEYAHAY MIISAANIYADA MAGAALADA

Aafada korona fayras ayaa abuuray culays dhaqaale oo ka culus Sicir bararkii Waynaa Magaalada sanadkii 2008. Ganacsiyada waa la xiray, dadku waxay lumiyeen shaqadooda ama waa laga cayriyay shaqada waxaana jiro habsiino la'aan wayn oo ku aadan dhaqaalaha. Ganacsiyo badan ayaa qarka u saaran inay xirmaan, ayna ku jiraan ganacsiyada hudheelada iyo raaxada. Magaalada Bloomington, tani waxay uga dhigan tahay malaayin doolar oo laga waayay canshuuraha hudheelada iyo diiwaan gelinnada, kuwaasoo ay inta badan bixin jireen dadka soo booqda Bloomington, maaha dadka magaalada dagan. Dakhliga hudheelada iyo diiwaan gelinta ayaa caadiyan soo saara 13% dakhliga guud ee magaalada, kuwaas oo lagu maal geliyo adeegyada muhiimka ah ee Magaalada sida Booliis, shaqooyinka Dab damiska iyo Arimaha Bulshada. Aafada cudurka awgeed, dakhliyadaan waxay hoos u dhaceen wax ka badan \$5 milyan, ilaa wax ka yar nus cadadkay ahaayeen kahor aafada COVID-19.

DAKHLIYADA GUUD EE MAGAALADA KAHOR COVID-19



TALAABOYINKA LA QAADAY SI LOO MAAREEYO QARASHAADKA

Magaaladu waxay aad uga shaqaynaysaa ka jawaabida khasaarada socota ee dakhliga, ayadoo wali bixinaysa adeegyada muhiimka ah ee bulshadeenu ku tiirsan tahay. Waxaan ogaanay in dad badan oo deegaanka ah iyo ganacsiyo ay waajahayaan dhibaatooyin dhaqaale sabab la xariirta aafada waxaana qaadaynaa talaabooyin aan ku xakamaynayno qarashaadkeena aana ku yaraynayno saamaynta canshuuraha guryaha. Magaaladu waxay doonaysaa inay isku dheeli tirto miisaaniyada 2021 ayadoo:

- Xakamaynta qarashaadka shaqaalaha iyo yaraynta jagooyinka shaqaalaha
- Adeegsiga lacagaha kaydka ah marka la heli karo
- Inaan si taxadar leh u qiimayno adeegyada magaalada dhinacyada wixtarka iyo hoos dhigista suuragalka ah
- Qiimaynta qiimayaasha dulsarta si loogu qaato dayn mashruucyada halkii laga bixin lahaa kaash

KA QAYBGELINTA BULSHADA DOODAHA MIISAANIYADA

ayadoo la wado dadaalo lagu xaqiijinaayo in doodaha Miisaaniyada 2021 ay qayb ka yihiin dookhyada bulshadu, Dawlada Hoose ee Magaadu waxay magacaawday Gudigga Talo Bixinta Miisaaniyada ee bulshada bishii Maajo 2020. Gudigga talo bixintu wuxuu ka kooban yahay sagaal qof oo deegaanka ah oo aqoon u leh miisaaniyadaha magaalooyinka iyo dawlada magaalada. Lagasoo bilaabo Juun ilaa Oktoobar, Gudigu waxay daraaseeyeen miisaaniyada iyo adeegyada magaalada, waxayna sameeyeen barnaamijyada ka qaybgelinta bulshada oo badan si Dawlada hoose ee Magaalada loo siiyo talooyin isku dheeli tirka miisaaniyada. Markaan eegno miisaaniyada guud, halkii aan ka yarayn lahayn adeegyada mid ba mar, Dawlada hoos ee Magaalada, Gudigga Talo Bixinta Miisaaniyada ee Bulshada iyo shaqaalaha Magaalada ayaa higsanaaya xaqiijinta in isbadalka adeeggu muhiimada siiyo waxyaabaha bulshadu doonayso.

Dhanka danbe ee bogaan waxaa ku jira xog dheeraad ah oo ku saabsan miisaaniyada qabyada ah ee Magaalada iyo canshuurta guryaha, iyo sidoo kale xog ku saabsan meesha aad ka helo karto xog dheeraad ah, sida aad noola wadaagi karto fikirkaaga iyo qaababka aad uga qaybgeli karto dhagaysiga dadwaynaha ee Diseembar 7. Waxaan filaynaa inaad fiirin doonto.

James D. Verbrugge, Maareeyaha Magaalada
jverbrugge@BloomingtonMN.gov


Lori Economy-Scholler, Madaxa Waaxda Maaliyada
leconomy@BloomingtonMN.gov



LACAGTA CANSHUURTA GURIGAAGA EE MAGAALADA

Jaantuskaan wuxuu muujinayaa sida lacagta canshuurta guryaha ee magaalada loogu qaybsho adeegyada Magaalada. Sida aad u jeedaba, inta badan canshuurta guryaha waxaa lagu taageeraa adeegyada aasaasiga ah sida booliiska, dab damiska, shaqada bulshada, iyo jardiinooyinka iyo baashaalka. Halkii doolar kasta oo lagu bixiyo canshuurta magaalada, 38 boqolkiiba waxaa lagu baxshaa booliiska iyo dab damiska, 16 boqolkiiba waxaa lagu baxshaa shaqooyinka dawlada halka 14 boqolkiiba lagu baxsho jardiinooyinka iyo beeraha raaxada ayadoo 8 boqolkiiba lacag kasta oo canshuurta Guryaha Magaalada ah lagu bixiyo adeegga daymaha magaalada lagu leeyahay. Daynta waxaa lagu baxshaa dhisida wadada iyo shaqada kaabayaasha iyo mashaariicda dhismaha. Awooda soo sarista dayn mustaqbalka ah oo dulsaar yar leh ayaa siinaysa bulshadeena inay sii wadaan kanasoo kabtaan dhaqaale dhaca ayadoon aad loo kordhin canshuuraha guryaha ee adeegga daynta.

QOONDADA CANSHUURTA GURYAHA MAGAALADA



- Booliiska iyo Dab damiska
- Shaqooyinka Dawlada
- Beeraha raaxada iyo Jardiinooyinka
- Hormarinta Bulshada
- Wax kale
- Adeegyada Daynta
- Caafimaadka Dadwaynaha

MEESHA AAD KA HELAYSO XOGTA DHEERAAD AH OO KU SAABSAN MIISAANIYADA MAGAALADA:

Si aad u hesho xog faahfaahsan, ayna ku jiraan bandhiyada shaqaalaha, xogta kooban ee fikradaha bulshada iyo qodobada kulannada gudigga, fadlan booqo blm.mn/cbac.

SPANISH TRANSLATION:

El consejo municipal de la ciudad de Bloomington convocará una audiencia pública para escuchar de usted sobre la propuesta de recaudación de impuestos y el presupuesto de la ciudad para el año 2021, el día lunes, 7 de diciembre a las 7:00 p.m. Para más información en español, por favor visite la página de la red del internet blm.mn/property-tax

SOMALI TRANSLATION:

Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa kulan lagu dhegeysanayo dadwaynaha Isniinta, Diisambar 7 markay tahay saacada 7:00 fiidnimo si lagaaga dhageysto adiga arrinta ku saabsan cashuur saarida iyo miisaaniyada Magaalada 2021 ee la soo jeediyay. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku qoran Af Soomaali, fadlan booqo blm.mn/property-tax

VIETNAMESE TRANSLATION:

Hội Đồng Thành Phố Bloomington sẽ tổ chức một buổi điều trần công cộng vào thứ Hai, ngày 7 tháng Mười hai, lúc 7 giờ tối để nghe ý kiến của quý vị về đề xuất ngân sách và vấn đề đánh thuế năm 2021 của Thành Phố. Để tìm hiểu thêm bằng tiếng Việt, vui lòng truy cập trang mạng blm.mn/property-tax